

Ajansiyo kala duwan

(Fadlan riix khadka buluuga ah si aad ugasho beejka macluumaad dheeraad ah na aad u hesho)

Hoos waxaa ku yaal meel aad ka gali karto magacyo ajansiyo kala duwan beejkooda iyo waxa ay qabtaan oo ardayda ka caawin kara waxbarashada, waalidku qudhooda iyo waliba komunitiga ku sugan Moss Side. Riix ama taabo khadka buluuga ah si aad u ogaato macluumaad dheeraad ah.

Kooxda [PIP](#) waxay caawisaa iskuulada ku yaal Moss Side, waxay ku taqasuseen oo ay eegeen caruurta sida ay iskuulka u imaadaan maalin walba, waxayna eegaan sida ay ciyaalka udhaqmaan (xaga edebta) iyo faamaliyadana way caawiyaan.

[Reach Out](#) waxay tahay jaarati iskuulada Manchester ku yaal ka caawiya inay usoo diraan dad la yiraahdo Mentors ku waas oo caruurta ka caawiya xaga waxbarashada iyo edebta. Waxayna Mentors kaas ka yimaadaan Jaamacada Manchester, waxayna la shaqeeyaan caruurta dhigataa fasalada 1aad ilaa iyo fasalada 6aad.

Iskuulka waxa uu xiriir wayn la leeyahay [Greater Manchester Police](#) iyo [Manchester Fire Service](#).

[Kath Locke Centre](#) waxa uu yahay komuniti caafimaadeed oo caawiya dadka degan Moss Side, waxayna ka caawiyaan wax kasta oo ku saabsan xaga caafimaadka.

[The Adventure playground](#) ee ku taal wadada Alexandra Road waxayna bixisaa wax yaabo iyo meel ay dhalin yarada Moss Side degan ay isugu imaan karaan.

[Sure Start](#) ee ku taal Alexandra Road waxay bixisaa meel ilmaha lagu xanaaneeyo maalintii, ilmahaas oo ah kuwa 3 sano iyo wixii ka yar.

St Mary's waxay xiriir xoog leh la leedahay ajansi ka soo horjeeda burcada lana yiraahdo [Crucial Crew](#) waxayna la shaqeeyaan fasalka 5aad iyo fasalka 6aad.

[The Powerhouse](#) waa meel xarun loogu tala galay caruurta iyo dhalinyarada dadoodu tahay 8-25 jir, waxaad xaruntaas hadaad tagto ka isticmaali kartaa kombuyuutarka, waxaa kaloo caruurta laga caawiyaa waajibka iskuulka iyo waxay kaloo isticmaali karaan meesha lagu cayaaro oo lagu sameeyo jimicsiga jirka.

[The Windrush Centre](#) waxay bixiyaan tababar xaga kombuyuutarka ah, waxayna ubanaan tahay oo is isticmaali karakomunitiga agagaarka xarunta degan iyo kuway xiriir la leeyihiin.

[The Manchester Museum](#) waa matxaf taariikhi ah oo kaa caawin kara arday ahaan inaad barato taariikhda iyo sayinska, waadna booqan kartaa matxafka si aad usoo aragto wax yaabaha taariikhiga ah ee yaal.

[The Whitworth Art Gallery](#) waa meel lagu aruuriyo wax yaabaha farshaxanka, sawirada, wax qurxinta iwm.

[The Chrysalis Family Centre](#) waxay ilmaha Moss Side degan ka caawiyaan waajibka iskuulka, waxayna furan yihiin Isniinta ilaa Jimcaha.